

# Baaritaanka COVID oo Kharash La'aan u ah Dhammaan Rer Minnesota

10/11/2021

Minnesota waxay guryaha ku siinaysaa baaritaanka candhuufta ee COVID-19 qof kasta oo ku nool Minnesota calaamado haddii uu leeyahay iyo haddiiba aanu lahayn lacag la'aan. Agabyada baaritaanka candhuufta ee Vault Health waa baaritaano silsilad falcelin ah polymerase, baaaritaanada molecular-ka ah oo sheega nooca hidaha fayraska.

Waxad ku dhammaynaysaa baaritaanka guriga oo u diraysaa natiijada Vault Health. Waxa isla mar dirsan kartaa laba agabyada candhuufta ee baaritaanka Vault ee COVID-19. Waxaad ka hubin kartaa xaaladda baaritaankaaga markaad gasho websaydka Vault. Caadiyan agabyada baaritaanka candhuufta ee Vault waxa lagu diraa maalin gudaheed helitaanka codsiga kadib.

**Dhammaan kharashaadka baaritaankan waxa daboolaa caymiskaaga ama dawladda federaalka ama gobolka. HA SIININ KHARASHKA caymiska ama bixiyaha baaritaankaaga COVID - KHARASH MA LAHA baaritaanku.**



Minnesota Department of Health | [health.mn.gov](https://health.mn.gov) | 651-201-5000  
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

Contact [health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us) to request an alternate format.